Dalbashada Magangalyo doonkaaga (Your Asylum Claim)

Ka dalbashada Magangalyo gudaha Ingiriiska

Haddii aad ka fakarayso ka soo tegista waddankaagii hooyo illaa iyo safarkaaga inuu noqonayo mid ay ka buuxaan xasuuso dhib dadan. Imaatinkaaga Scotland waxaa xitaa dhici karta inuu noqdo waqti xilli dhib badan adiga kugu ah. Waxa xitaa dhici karta inaadan maqlin Scotland inta aadan imaan ka hor! Waa muhiim inaad ogaato inaad hadda ammaan tahay waxaana jira ururo tiro badan iyo dad oo ku caawin kara kuna caawin doona adiga. Caruurta iyo dadka dhalinta yar waxay u nugul yihiin dhibka, laakiin gudah Scotland caruurta waxay leeyihiin xaquuq. (Eeg qayba ku saabsan '**Xaqquuqahaaga**')

Marka aad timaado waxyaalo badan ayaa si fudud u dhici doona waxaadna la kulmi doontaa dad badan oo cusub. Dadka adiga ku taageeraya way sidaas ogaadaan waxayna kuula shaqaynayaan si xasaasiyad leh. Waxaa dhici karta inay dhib kugu noqoto rumaynta dadka waa wayn ee isku dayaya inay adiga ku caawiyaan. Dhamaan dadka ku taageeraya adiga waa inay tixgeliyaan sirtaada (confidentiality[9]) aan ka ahayn marka aad u muuqato inaad khatar ku jnirto. Sida aan rajaynayno waqti kadib waxaad nala qaybsan doontaa akhbaar muhiim ah oo sidaa darteed adiga ku caawin kara.

Sababta laguugu yeeray (Why are you called an Unaccompanied Asylum-Seeking Child (UASC) ama cunug dadkiisa ka soo tagay or separated child?)

Sababta laguugu yeeray (Why are you called an Unaccompanied Asylum-Seeking Child (UASC) ama cunug dadkiisa ka soo tagay or separated child?) Dadka qaar ma isticmaalaan kalmadda 'qaxooti' laakiin waxay booskeeda ka hadlaan 'magangalyo doonaayaal'. Tani waxay macnaheedu tahay in la kala saaro kuwa magangalyo doonkoodii la ogolaaday (qaxooti) iyo kuwa weli sugaya go'aan (asylum seeker). Waxaa kaloo jira ereyo gaar ah ee loogu talo galy caruurta jooga booskaaga: 'caruur soo tagey' iyo 'unaccompanied asylum seeking children' (UASC).

Wasaarada Home Office's[19] qeexitaankeeda UASC waa:

'An unaccompanied asylum-seeking child waa qof, marka la samaynayo codsiga magangalyo doonka ah, ama (haddii aan la caddayn karin) u muuqda, wax ka yar 18 jir, kaasoo si xaquuqdiisa ah u dalbanaya magangalyo isla markaana aan ku haysan qof wayn oo qaraabo ah ama guardian[17] uu u tago gudahan waddankan.'

Sids aad arki doontid waxaa jira ereyo badan oo u baahan in laguu sharxo sababta aad halkan u timid iyo waxa ay tahay inaad samayso. Waxaa dhici karta inay kuula muuqato in dadka ay diyaar u yihiin inay wax kugu summadeeyaan ayna illoobaan in qaxootinimada ay tahay waayoargnimo ku dhic karta dadka aysanna ahayn wax ay dadka doortaan.

Sharciga waxaa dhici karta inuu kuula muuqdo mid ku cabsi gelinaya oo dhib badan laakiin waxaa jira sharciyo ku ilaalinaya kuna taageeraya. (Eeg qayba ku saabsan '**Xaquuqahaaga**')

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Magangalyo doonka & Sharciga (Asylum & the law)

Waddanka United Kingdom (Scotland waa qayb ka mid ah) waxaa laguu aqoonsanayaa inaad tahay qaxooti haddii adiga iyo qoyskaaga dhibaato loogu soo gaystay sabab ka mid ah kuwan soo socda aadna dareento inaadan noqon karin maxaa yeelay waxaad galaysaa khatar:

- sinjigaaga (race);
- diintaada (religion);
- waddaniyadaada (nationality);
- maxaa yeelay adiga iyo qoyskaaga waxaad xubin ka ahaydeen koox gaar ah ama waxaad qabteen aragti siyaasadeed oo gaar ah.

Sababahan waa qayb ka mid ah sharciga caalamiga ee lagu magacaabo the 1951 UN Convention on Refugees.

Sharcigan aad buu u xaddidan yahay - waxuuna daboolaa oo keliya noocyo gaar ah ee dhibaatada dadka soo gaartay. Adiga iyo qoyskaaga waxaa dhici karta inuu dhib idiin soo gaaray sababo ka duwan. Haddii dawladda (Home Office[19]) ay qabto in lagu amaan geliyo sababo kale waxay ku siinayaan hab kale oo si ku meel gaar ah aad ku joogi kartid. (Tan waxaa dib loogu sharxi doonaa ‘Go'aankaaga Magangalyo doonka’)

“Waxaan imid Glasgow anigoo ka imid Pakistan, wax walba waxay ila ahaayeen si kale. Waxaan dareemay kelinimo, ma fahmayn luqada mana garanayn waxaan sameeyo. Hadda waxaan ahay qof si fiican loo xanaaneeyay, dugsi aada, saaxiibo leh waxaana aan bilaabayaa inaan luqada aad u sii fahmo aad baana hadda u faraxsanahay. – Zia”

Fahanka Nidaamka Magangalyo doonka (Understanding the asylum process)

Dalbashada Magangalyo doonka waxay noqon kartaa mid dhib badan. Si lagaaga caawiyo inaad si fiican u fahanto waxaa ku jira masawir gadaasha xirmadan.

Raadsashada Magangalyo (Seeking asylum)

Home Office
BUILDING A SAFE, JUST AND TOLERANT SOCIETY

Marka aad dalbato ilaalintan waxaa sida guud lagu magacaabaa 'raadsashada magangalyada'waxaana jira sharciyo iyo xeerar aad u dhib badan. Qayb gaar ah oo ka mid ah Home Office[19] oo la yiraahdo UK Border Agency (loona yaqaano UKBA[21]) ayaa masuul ka ah la macaamiloonta kiiskan. Tani waxay u muuqan kartaa wax ku cabsi geliya laakiin dhammaan daka adiga ku caawinaya way fahmayaan waana inay tan cilmi u leeyihiin waana inay awoodaan inay ku siiyaan taageero iyo hagitaan.

Sidee u dalbanaysaa magangalyo (How do you claim asylum?)

Marka aad samaynayso codsi magangalyo ma sahlana – waxay sidoo kale ahaan kartaa mid ku wareerisa. Marka aad imaato dad dhowr ah ayaa ku waydiinaya wax ku saabsan sheekadaada, tusaale ahaan qofkaaga legal representative[24] iyo adeega UK Border Agency (UKBA)[21]. Sharciyada iyo xeerarka ee khuseeya kiiskaaga waa ay dhib badan yihiin qofkaaga legal representative[24] ah waa inuu adiga kuu sharxaa. Haddii aad su'aal qabto ama aadan fahmin aad bay muhiim u tahay inaad inaad sidaas u sheegto waana iska caadi inaad su'aalo waydiiso!

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Sababtee ugu baahan tahay (Why do you need a legal representative?)

Illaa waqtigan waxaa dhici karta inaadan weligaa yeelan baahida aad u qabto qof legal representative[24] waxaana xitaa dhici karta inaadan fahansanayn waxa ay kuu qaban karaan ama ay tahay inay adiga kuu sameeyaan. Marka aad dalbato magangalyo waa muhiim inaad ogaato maadaama aad tahay cunug aan la wehlin inaadan bixinayn wax lacag caawimaadaada sharciga ah. Qofkaaga legal representative[24], kaasoo xitaa loo yaqaano solicitor, lawyer (qareen) ama adviser (la-taliye), waxuu meesha u jooga inuu kaa caawiyo samaynta go'aamadaada. Ma awoodaan inay sameeyaan go'aano iyagoo magacaaga ku hadlaya, laakiin waxay kaa caawinayaan nidaamka iyo fursadahaaga. Adaa hawsha wada waxaadna u baahan tahay inaad u sheegto qofkaaga legal representative[24] waxa aad u baahan tahay in la sameeyo.

Dhamaan legal representatives[24] waa inay ujeedadoodu tahay inay kuula shaqeeyaan si xirfadnimo. Waad u caban kartaa toos hay'adooda sharciga ama adigoo u sii maraya urur lagu magacaabo *Office of Immigration Services Commissioner* (OISC).

Haddii aadan ku faraxsanayn qofkaaga legal representative[24] waad la xiriiri kartaa Scottish Refugee Council si aad u waydiisato caawimaad iska bedelida qofkaaga legal representative[24].

Akhbaar dheeraad ah oo ku saabsan ururadan eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan.

Ma tahay mid aanan ku faraxsanayn qofka sharciyan ku matalaya (Are you unhappy with your legal representative?)

Haddii aadan ku faraxsanayn qofkaaga legal representative[24] aadna dareensan tahay inay si xun kuu mataleen waxaad la xiriiri kartaa ururadan si aad cabasho u samayso ama aad hesho legal representative[24]:

OISC (Office for the Immigration Services Commissioner)

Ururkan waxuu masuul ka yahay hubinta in dhammaan talooyinka waaxda socdaalka loo sameeyay si aad u heer sarraysa. Boggooda internetka waxa ku bixiyaa akhbaarta luqado kala duwan. www.oisc.gov.uk

The Law Society of Scotland

Ururkan waxuu masuul ka yahay dhammaan qareenada ka shaqaynaya Scotland. Waxay haystaan liis legal representatives[24] ee ka shaqeeya talooyinka socdaalka taasoo ay ku sheegayaan bogga internetks www.lawscot.org.uk

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Interpreters

Haddii af Ingiriis uusan ahayn luqadaada koowaad waad inaad codsataa interpreter[22] kaasoo ku hadla afkaaga marka waxaad ka yeeli kartaa naftaada qof fahmay waxa dhacay ama dhacaya. Waad codsan kartaa qof lab (male) ama dheddig (female) interpreter[22].

Maxaa dhacaya waraysigaaga screening?

UK Border Agency (UKBA)[21] waxay doonayaan inay adiga kula hadlaan waxaana sidoo kale lagu bari doonaa qofkaaga case owner[6]. Kani waa qofka ka socda UK Border Agency (UKBA)[21] oo masuulka ka noqon doona kiiskaaga magangalyo doonka. Waad codsan kartaa lab ama dheddig case owner[6]. Waxay ku waydiin doonaan su'aalo shakhsi ah ee ku saabsan taariikhda qoyskaaga iyo sida aad ugu soo safartay Scotland. Sidoo kale waa lagu sawiri doonaa farahaagana waa lagaa qaadi doonaa. Tani sababta maaha inaad wax qalad ah samaysay – keliya waa qayb ka mid ah habka diiwaan gelinta.

Waxaa lagu siin doonaa ARC (Application Registration Card) – kaarkan waa muhiim waxuuna kuu matali doonaa sida warqadda aqoonsiga. Hubi inad ku xafiday meel ammaan ah hana dhumin. Hubi akhbaartaada ku qoran (sida loo qoray magacaaga iyo taariikhdaada dhalashada) inta aadan tegin. Haddii ay qaldan yihiin qof u sheeg markiiba codsana in lagaa bedelo. Waxaa dhici karta inay dhib noqoto in gadaal laga bedelo haddiina uu mid ka mid ah akhbaarta uu qalad yahay waxay dhib ku keeni kartaa dalbashadaada magangalyada.



Waraysiga screening waxaa dhic karta inuu qaato saacado dhowr ah waxuuna noqon karaa mid lagu daalo marka waa muhiim inaad taas isku soo diyaariso. Isku day kalana hadal waraysiga qofkaaga legal representative[24] ama shaqaalaha bulshada[30] inta ballanta ka horaysa. Qof waa inuu kula socdaa marka uu waraysiga dhacayo kaasoo kuu matalaya sida 'qof wayn oo masuul ah' – waxay halkaas u joogaan inay adiga ku taageeraan laakiin kuuma hadli karaan adiga. Haddii aad walaac ka qabto waraysiga la hadal dadka adiga ku taageeraya.

Waxaa dhici karta in laguu sheegay waxyaalo qaarkood inaad dhado ama aadan dhihin dadkii ku keenay waddanka waxaana dhici karta inaad ka baqayso inaad tiraahdo wax ka duwan. Fadlan ogoow waxaa jira ururo badan iyo dad xiisaynaya wanaagaaga haddii marka aad waxaas ka walwalayso iyaga la hadal. Qofkaaga legal representative[24] waa mid iyaga ka mid ah. Aad bay u fiican tahay inaad runta sheegto bilowga iskuna day inaad bixiso akhaabr badan sida ugu macquulsan.

Waxaad haysan kartaa interpreter[22] haddii Ingiriis uusan ahayn luqadaada koowaad. Haddii aad door bidayaso lab ama dheddig interpreter[22] ah waa inaad u sheegtaa qofka sharciga ee ku matalaya (legal representative[24]) ama social worker[30]. Waa inaad sidoo kale u sheegtaa luqada aad tarjumaanka u rabto interpreter[22] ee aad isticmaalayso. Haddii aadan ku faraxsanayn interpreter[22] waqti KA MID AH inta lagu jiro waraysiga markiiba waa inaad qof u sheegtaa.

Waraysiga waxaa dhici karta in la duubo; tani ma aha waxay tahay inaad ka welwesho. Waxaa dhici karta inay ku xasuusiso waxaad markii hore tiri isla markaana kaa caawisa inaad sheekadaada u sheegto si isku kid ah. Qofka legal representative[24] waxuu awoodaa inuu kuu keeno nuqul (copy) cajaladan ah.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Tegitaanka Home Office

Waxaa dhici karta in lagu waydiiyo inaad tagto xarunta kuugu dhow ee la iska xaadiriyo ee Home Office[19]. Qofkaaga case owner[6] baa go'aan ka gaaraya sida iyo waqtiyada ay tahay inaad isa soo xaadiriso laakiin tani waa in lagala xaajooda adiga iyo qofkaaga social worker[30].

Xarayntaada Statement of Evidence Form (SEF)

Xarayntaada Statement of Evidence Form (SEF) Marka lagula yeelanayo waraysiga Screening ayaa lagu siinayaa foomka waana in la buuxiyaa iyadoo lala kaashanayo qofkaaga legal representative[24] 20 maalmood ee shaqo gudahooda. Hubi in qof walba oo ku taageeraya uu og yahay waqtigan kama dambaysta ah.

SEF waa in lagu buuxiyaa ag Ingiriis. Qofkaaga legal representative[24] ayaa kaa caawin doona haddii xitaa loo baahdo waxaa lagu siinayaa taageerada qof ah interpreter[22].



Home Office
BUILDING A SAFE, JUST AND TOLERANT SOCIETY

Statement of Evidence Form - Children
(for self-completion)

NOTES TO HELP YOU COMPLETE THE FORM

- Before you complete the form, please read these notes carefully. They help you to complete the form and to understand how we treat your application.
- The form asks you to write down why you fear returning to your country and why you claim asylum in the United Kingdom (UK). Please answer in English, using your own words. If you use any other language you must give an English translation.
- If you provide any supporting information, it must be in English or translated into English.
- This form is free of charge.

When to return the form:

The completed form must reach us on or before 03/05/2006_____ [day, month, year]

How to return the form:

1. Post it to:
   SEF,
   Asylum Co-ordination Unit (ACU1)
   P.O Box 1234, Croydon CR9 1ZX.
2. Deliver it yourself to:
   The Public Caller Unit,
   Lunar House,

Waa muhiim in foomkan uu wato dhammaan akhbaarta muhiimka ah ee la xiriira kiiskaaga marka sidaad darteed qofka kuu ah legal representative[24] waxuu adiga kuu samayn karaa kiiska magangalyo ee ugu fiican.

Marka sidaas darteed waa fikrad fiican inaad waqti geliso inta aadan la kulmin qofkaaga legal representative[24] ee akhbaartaada diyaarinaya. Isku day inaad qorto sheekadaada, qor taariikhyada iyo waqtiyada ay arrimaha dhaceen. Waad xitaa sawiri kartaa masawiro, sida halka uu gurigaaga ku yaalay ee degaankii aad ku noolayd ama nooca dharka ee ay dadku xiran jireen, ama xitaa ku biloow sawirkiina family tree[14]. Haddii qaar ka mid ah xasuusahan ay niyadda kaa jebinayaan, qof baad arrintan kala hadli kartaa; ma ay noqonyaan kuwo ka naxa ama ka yaaba laakiin waa ay ku taageeri doonaan adiga. Midda ugu muhiimsan waa ay ku dhagaysanayaan rumaynayaana waxa aad u sheegaysi, inta aad ugu sheegayso wax walba sida daacada ah ee ugu suurtogalsan.

Wasaarada Home Office[19] waxay kuu aqoonsataa inaad tahay caruur. Tani macnaheedu waxa ay tahay asylum process[3] waa inuu kuu tixgeliyaa kuulana macaamiloodaa sidii cunug. Tani waxay sidoo kale macnaheedu tahay in la raaco siyaasado iyo xeerar kale marka ay noqoto qaaditaanka qoraalkaaga. iyo waraysi walba, tusaale ahaan, waraysigaaga screening, waa inuu qaada shaqaale si gaar ah loo tababaray.

Waa muhiim in qof walba uu tixgeliyo xaquuqahaaga cunug ahaan iyo sidoo kale bani'aadnimo ahaan. Waxaad leedahay xaquuqo waana in la aqoonsadaa.Waxaad xaq u leedahay inaad hesho xirfadle tababaran oo ah interpreter[22] dhammaan xaaladaha oo idil gaar ahaan inta lagu jiro kulamada muhiimka ah iyo waraysiyada waxaana sidoo kale xaq u leedahay inta lagu jiro waraysiyada muhiimka ah ee UK Border Agency (UKBA)[21] laguugu duubo cajalad. Tani waxay adiga kaa caawinaysaa inaad dib uga fakarto waxaad tiri kadibna aad la hubiso qofkaaga legal representative[24] haddii loo baahdo.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Go'aanka magangalyo doonka

Mararka qaar waxay qaadan kartaa waqti dheer inta aad ka helayso go'aan ku saabsan dalbashadaadii magangalyada.Isku day inaadan walwalin. Inta qofkaaka legal representative[24] uu wax walba waxii ugu dambeeyay ee ku saabsan kiiskaaga uu kaala socodsiinayo waxaad ku qabtaa kalsooni iyaga, isku day ahowna qof samra.

Waxa soo socda noocyada kala duwan ee go'aano oo lagu siin karo:

> Refugee Status

Sharciga la siiyo haddii uu qof Home Office[19] go'aansado inay ka soo baxeen qeexitaankii qaxootinimo ee lagu sharxay xeerka *1951 Refugee Convention*. Qofka leh sharciga Refugee Status[28] waxaa sidoo kale la siiyaa sharci kale ee waaxda socdaalka ka yimid ee la dhahoLimited Leave to Remain ee uu qofku ku joogayo UK. Limited Leave to Remain waxa uu ku xaddidan yahay ugu badnaan 5 sano.

> Humanitarian Protection

Sharcigan waxaa isaga la siiyaa dadka loo diiday Refugee Status[28] laakiin aanan ku noqon karin waddankii ay asalkooda ka yimaadeen maadaama ay dhici karto inay wajahaan khatar wayn oo soo gaarta noloshooda ama qof ahaantooda ama macaamilo aan bani'aadnimo ahayn ama lagu baaba'inayo ama ciqaabayo lagu sameeyo. Inta badan waxaa la siiyaa 5 sano kadib dhamaadka waqtigaas kiiska mar kale ayaa dib loo eegaaa.

> Discretionary Leave

Waa sharci la siiyo dadka loo diiday Refugee Status[28] isla markaana aan buuxin xaalada Humanitarian Protection[20], laakiin loo ogolaaday inay joogaan guadaha waddanka UK si ku meel gaara ah sababo kale dartood. Waxaa lagu bixiyaa oo keliya xaalado aad u xaddidan waxuuna socdaa illaa iyo inta aad ka gaarayso 17½ sano.


Home Office

Haddii lagu siiyay Discretionary Leave[11] ama Humanitarian Protection[20] waxaa sidoo kale lagu siin doonaa xaashi 'Sababihii Diidmada' ah. Tani waa xaashi ka timid Home Office[19] oo ka hadlaysa sababta loo diiday dalbashadaadii magangalyo doonka iyadoo la raacayo xeerka *1951 UN Convention ee Qaxootiga*. Waxay noqonaysaa dhib iyo niyad jab inaad akhriso xaashidan laakiin waa muhiim inaad akhriso oo aad fahanto. Qofkaaga legal representative[24] waa inuu adiga kula akhriyaa kuuna sharxaa wax walba oo aadan fahmin.

Samaynta appeal

Waxaa keliya oo aad racfaan ka qaadan kartaa appeal[1] haddii lagu siiyay Discretionary Leave[11] wax ka badan 12 bilood. Waxaa laguu soo diri doonaa foomka racfaanka adiga, qofka sharciga ee ku matalaya iyo shaqaalahaaga bulshada social worker[30] kaasoo ka xaajoonaya haddii iyo haddii aanan lagaa rabin inaad foomka buuxiso si aad maxkamad gaar ah u aado oo aad uga doodo go'aanka lagu diiday kiiska dalbashadaadii magangalyo doonka.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Ka dhig sharcigaaga dawladda mid ammaan ah

Marka lagu siiyo nooc sharci waxaa lagu siin doonaa warqadda sharciga iyo Immigration Status Document (ISD) Waa muhiim inaadan luminin sharciyadan. Waa inaad u xafidaa sharciga ISD si aad ammaan u ah waana inaad keliya mar walba qaadataa isagoo la masawiray (photocopy).



Dalbashada fidinta sharcigaaga joogista/Active Review

Haddii lagu siiyay nooc ka mid ah joogista xaddidan (tusaale Discretionary Leave[11]) illaa iyo inta aad ka gaarayso 17½ sano, waa inaad ka fakartaa haddii iyo haddii aadan rabin inaad dalbato sii fidinta sharcigaaga joogista inta uusan dhammaan. Tani macnaheedu waxay tahay waydiisashada dawladda inay adiga ku siiso joogis dheeraad ah oo aad ku joogto UK.

Haddii aad raadinayso sharci sii fidin waxaad u baahan tahay inaad la xiriirto qofk legal representative[24] ugu yaraan laba bilood ka hor inta uusan sharciga kaa dhammaan. Kadib go'aankaaga hore qofkaaga legal representative[24] waa uu xirayaa kiiskaaga. Uma baahnid inaad isla qofkii hore ku noqotid ama hay'addii sharci ee hore ee waxaad raadsan kartaa mid cusub haddii aad u baahan tahay.

Waa adiga masuuliyadaada inaad la xiriirto qof legal representative[24] waana inaad SIDAN yeeshaa inta uusan sharcigaaga joogista uusan dhammaan. Haddii aadan sidaa yeelin ma tihid qof si sharci ah ku deggan gudaha Scotland tanina waxay keeni kartaa dhibaatooyin.

Waxaa jira laba qaybood ee Active Review ama kiis sii fidinta. Waa inaad xaqiijisaa inaad samaysay isku day inaad dadka dhex gashay, inaad la qabsatey nolosha Scottishka, in aad adiga, tusaale ahaan, baratay ama baranayso af Ingiriiska ama waxbarasho kale ku jirtid. Waana inaad sidoo kale muujisaa uu yahay meel adiga aad khatar kuugu ah haddii aad u laabato.

Aruurinta xasuusahaaga

Waa inaad isku diyaarisaa dalbashada sii fidinta waqti aad uga horeeya inta aadan codisga samayn. Dadka dhalinyarada waxay qaarkood sameeyaan'sanduuqa xasuusta' – xafidid xarakaadkoodii iyo guulahoodii. Tani waxaa ka mid noqon kara kaararka warbixinta dugsiga, shahaadooyinka dugsiga iyo kulliyadda laga qaatay, xaashiyaha mushaarka, qoraalada macallimiinta, shaqadaada, masawirro iyo/ama waraaqo ee kooxa jaaliyadaha ama tabaruca ee aad adiga ku taxaluqday.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Samaynta sanduuqa xasuusta waxa ay kaa caawin doontaa inaad ka fakarto sababaha aad rabto inaad u joogtid gudaha Scotland. Kala hadlidda iyo aruurinta akhbaartan ee dadka adiga ku taageera waxay kaa caawinaysaa waxa aad rabto iyo waxa ay tahay in la sameeyo.

U sheeg dadka waxaad ADIGA rabto

Dad badan ayaa ku taxaluqi kara kiiskaaga, (adiga kuu shaqeeya ama kula jooga), marka waa ay fududahay inaad isku buuqdo. Qofkaaga legal representative[24] adiga ayuu ku matalayaa laakiin waxaad u baahan tahay inaad wax u sheegto isaga/iyada. Waa adiga noloshaada waxaadna u baahan tahay inaad hubiso inaad helayso caawimaadii iyo taageeradii loo baahnaa. Waxaad adiga u baahan tahay inaad dadka u sheegto waxa aad u rabto iyo sida ad u dareemayso arrimaha.

Maxaa dhacaya haddii dalbashadaada magabngalyo doonka ah si buuxda loo diido?

Maxaa dhacaya haddii dalbashadaada magabngalyo doonka ah si buuxda loo diido? Haddii laguu diido magangalyo waa arrin aad niyadjab u ah laakiin dadka adiga ku taageeraya ayaa kuu jooga inay kula hadlaan kuuna soo bandhigaan taageero. Adiga iyo qofkaaga legal representative[24] waxay go'aansan karaan inay racfaan ka qaataan arrintan in kastoo ay noqon karto nidaam dhib badan oo qaadan kara muddo dheer. Talo fiican ee sharci waa arrin aad muhiim u ah. Haddii aadan ogayn waxa dhacaya ama aadan fahansanayn fadlan waydii! Haddii aad racfaan qaadato adiga ama qofkaaga legal representative[24] waxuu aadayaa maxkamad gaar ah oo lagu magacaabo Asylum and Immigration Tribunal (AIT[2]). Mid ah AIT[2] ayaa ku taala gudaha Glasgow.

Waxaa kula joogi kara qof walba oo aad jeceshahay waxaana mar walba meesha joogaya interpreter[22] haddii aad mid u baahan tahay. Qofka legal representative[24] waxa uu adiga kuu soo diyaarinayaa dhagaysiga maxkamadda kadibna xaakim madax bannaan ayaa go'aaminaya in dalbashadaadii magangalyo doonka la ogolaado ama la diido.

Maxaa dhacaya haddii aanan mar dambe racfaan qaadan karin?

Haddii aad adiga atahay 'Appeal Rights Exhausted' (ARE) tageerada aad helayso waa inay sii socotaa. Home Office[19] waxaa dhici karta inay kuu soo diraaq waraaqo kugu dhiirigelin kara inaad ku noqoto waddankii aad asalkaaga ka timid. Waa inaad heshaa talo kaa caawinaysa sidii go'aankan uga fakari lahayd. Xasuuso, ku noqoshada wadankaagii asalka ahaa weli lama qorshayn illaa uusan ka noqon mid adiga ammaan kuu ah haddii aad ku noqoto waxaana jirta qiimaynta xaalada khatartaada ee adiga.

Masuuliyada dawladda ee xagaaga ma dhamaanayso haddii magangalyo laguu diiday waana inay caddahay inaysan wax khatar ah adiga ku gelinayn. Social Work Services[31] waa inuu si firfircoon arintan ugu jiraa. Ururro kale ayaa arrintan xiisayn kara waadna la xiriiri kartaa si aad ugala xaajooto xaaladaada, tusaale ahaan Scottish Refugee Council.

"Aad bay u adag tahay inaan ka soo fogahay gurigaygii hooyo, laakiin halkaas ammaan kumaynu ahayn. Marka dadka badankiisa ay halkan yimaadaa, sida aan aniga Uganda uga imid ma naqaano waxa aanu samyno. Ma naqaano sida loo xiriiro dadka degaanka ama wax ku saabsan habka ay u nool yihii. - Aisha"

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

Ururka International Organisation for Migration (IOM) waa urur dadka ka caawiya sida ay dib ugu noqon lahaayeen waddankoodii hooyo. Laakiin tani ma aha wax mar walba sahlan waana inaad si taxadar leh uga fakartaa fursadahaas.

Eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan waxii akhbaar dheeraad ah.

Waa sidee haddii la i siiyo go'aan ogolaansho ah ee dalbashadaydii magangalyada?

Haddii lagu siiyay magangalyo Social Work Services[31] waa inuu kuu soo bandhigaa dhammaan caawimaada iyo taageerada ee dadka kale ee dhalinyarada ah ay helaan. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qorshe xanaanayn. Hubi in waxyaalaha ugu fiican ee danahaaga in laguu qorsheeyay – kuwan waxaa ka mid ah hammigaaga iyo hadafyadaada (aspirations and goals). Waa adiga mustaqbalkaaga!

Ururo kale ayaa xitaa halkan kaa caawin kara. Scottish Refugee Council iyo adeegyo kale ayaa kaa caawin kara inaad ka fakarto waxa soo socda ee aad doonayso inaad samayso. Tusaale ahaan, waxay kaa caawin karaa inaad hesho waxbarasho, tababar iyo fursado shaqo waxayna kaloo ay kaa caawin karaan cayrta arrimaha guryaha. Waxay sidoo kale kuu diri karaan ururo kale ee ku caawin kara. Xasuuso waxaad leedahay xaquuqo iyo xaq u lahaansho. Ogoow waxa ay yihiin kadibna isticmaal iyaga!

Sharciga Safarka (Travel Document)

Haddii lagu siiyay Refugee Status[28] waxaad awood u leedahay inaad dalbato 'Sharciga Safarka'. Kan waxa uu kuu noqon karaa sida nooc caddayn waxaadna booqan kartaa wadamo kale. Xasuuso kani ma aha baasaboor oo ulama safri kartid waddankii aad asalkaaga ka timid, kaasoo loo go'aansaday inuusan mid ammaan ah uusan kuu ahayn ee aad adiga ku noqoto waqtigan hadda la joogo. Wadamo kale baa xitaa dhici karta inaysan isla markiiba kuu ogolaan inaad isaga la gasho, waxaadna u baahan kartaa dal-ku-gal (visa) taasoo adkaan karta sidii aad u habaysan lahayd.

Kala hadal arrintan qofkaaga legal representative[24] ama Scottish Refugee Council. Waxay kaala talin doonaan sidii aad u dalaban lahayd sharciga safarka kaana caawin doonaan sidii aad go'aan u gaari lahayd.

Waxaad dalban kartaa sharci safar oo aad u xaddidan haddii lagu siiyo Discretionary Leave[11] ama Humanitarian Protection[20] in kastoo uu kan yahay nidaam aad u dhib badan waa inaad si buuxda ugala xaajootaa qofkaaga legal representative[24] ama Scottish Refugee Council.

*Eeg Erey bixinta ee gadaasha tusahan si aad u aragto macnaha kalmadda lambarka leh

La xiriirista xubnaha qoyskaaga

Haddii aad dhumisay xiriirka xubnaha qoyskaaga sababtoo ah dagaal ama dhibaato markaas British Red Cross baa ku caawin karta adiga. Iyagoo sii maraya xiriirkooda caalami waxay kaa caawin karaan sidii aad u heli lahayd xubnaha qoyskaaga ama aad farriimo iyaga uga heli lahayd. La hadal qofkaaga social worker[30] ama legal representative[24] haddii aad doonayso inaad tan tijaabiso.

Waxaad kala xiriiri kartaa iyagat:

British Red Cross Refugee Unit,
Dabaqa labaad (Second Floor)
Ashfield House,
402 Sauchiehall Street
Glasgow G2 3JD
Telefoonka: 0141 331 4170

Scottish Refugee Council waxay ka shaqeeyaan dib isugu keenista dadka kala lumay. Laakiin sharciyada aad bay u adag yihiin dawladda UK ma laha sharci dhahaya xubnaha qoyska ee cunug aanan la wehlin ee magangalyo doon ah ay isla markiiba imaan karaan waddanka UK. Xaalado aan aad caadi u ahayn waa ay dhici kartaa inay suurtogasho.

Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato arrintan la hadal qofkaaga legal representative[24] ama booqo bogga Scottish Refugee Council.

Waxii akhbaar dheeraad ah ee la xiriira ururadan eeg **Tusaha cinwaanada** ee gadaasha xirmadan.